

Ku:- Guddoomiyaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed
Muqdishu

Ujeedo: Mooshin ka dhan ah jebinta Qaraarkii Baarlamaanka ee la
xiriiray Shirkadda ALBAYRAKH ee Dekedda Muqdishu

Mudane Guddoomiye.

Waxaan halkan kuugu soo gudbinaynaa Mooshin ka dhan ka ah amar ku taagleynta iyo jebinta qaraarkii Baarlamaaniga ahaa ee la xiriiray Shirkadda AL-BAYRAKH EE TURKIGA AH ee la sheegay in lagu wareejiinayo Dekedda Muqdisho iyadoo la soo marin hab sharciyeedkii ahayd in loo maro maalgashiga caalamiga iyo ka howl gelida goobaha u asteysan in ay yihiin halbowlayaasha DHAQAALAH qaranka sida Dekedda Garoonka dayaaradaha iyo wixii la mid ah.


Mudane Guddoomiye, Sidaad la socotidba, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu si buuxda ugu codeeyey in SHIRKADDA ALBAYRAKH ayan ka howlgeli karin Dekedda Muqdishu inta Sharciyadeeda la waafajinaayo dibna loogu soo celinaayo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Mudane Guddoomiye, Waxaa kaloo ihaano ku ah Baarlamaanka in Maamulka ALBAYRAKH ay mar walba si jees jees ah ugu dhahaan shaabiga hortiisa marka la warsado in Baarlamaanka qaraar ka gaaray arrimahooda inta ay qoslaan yiraahdaan annaga Baarlamaan iyo Gole Waziir midna ma naqaan ee waxaan na siiyey Dekedda Muqdishu Madaxwaynaha JFS arrinkaas oo si aad ah uga careysiiyey Xildhibaanada iyo Xoogsatada ka howlgasho Dekedda oo hadda lagu yiri isaga baxa.

Mudane Guddoomiye, Waxaan Mooshinkan kuu soo raacinay cabashada Howlwadeenada Shirkadaha maraakiibta, Xoogsatada Majakuus iyo Muruqmaalba. Waxaan kaloo halkan kuu soo raacinay wax qabadkii iyo hantidii la geliyey Dekedda oo si tasmaha aan kuugu soo lifaaqnay.

Mudane Guddoomiye, Mida ugu daran waxuu markhaati Guddoonka ka yahay gaar ahaan Guddoomiye Ku Xigeenkaada laad Dr. Jaylaani in Waziirka afkiisa laga hayo in uusan ka warhayn arrimaha Shirkadan ayna jirina Shirkad uu og yahay oo la siiyay Dekedda Muqdisho asagoo aan hadda ognahay in uu hormuud ka yahay dadka horboodayo arrimaha Shirkadda ka dib markii Madaxwaynaha uu amar ku siiyay in uu ku wareejiyo Shirkadan Dekedda Muqdishu. Waziirka wuxuu Golaha hortiisa ka qiray in ayan jirin horeyna u jirin wax loo sheegay oo la xiriiray arrimaha Shirkadda ALBAYRAKH wayna duuban tahay hadaladiisa maallintuu hor joogay Baarlamaanka. Waxaan rabnaa sababta ku kaliftay marin habaabintaas iyo waxa soo geliyey Madaxwaynaha arrimaha Fullinta iyo garab cararka maamulka Golaha waziirada.

Mudane Guddoomiye, Waxaan ka rabnaa Golaha Waziirada in ay cadeeyaan qofka jebiyey Qaraarka Baarlamaanka isla markaana waxaan si xushmad leh Guddoonka uga codsanaynaa in si Deg Deg ah uu ugu qoro Xafiiska waziirka laad meel marinta amarka Qaraarkii uu ka qaatay Baarlamaanka si loo badbaadsho sumcadda Baarlamaanka iyo shaqada danyarta Soomaaliyeed









Handwritten notes and signatures in the bottom right corner, including "H. B. Ali" and "20/9/2014".

ee halkaa ku baabaayo iyo weliba hantida ganacsatada Soomaaliyeed ee loo loogayo Shirkad
ajanabi ah oo wax dan ugu jirto dalka ayan jirin.

Mudane Guddoomiye, ugu danbayntii waxaan kuu sheegeynaa in SHIRKADAN ay qoratay
shaqaalaheedii uga howlgeli lahaa dekedda lana magac baxday MAP oo loo soo gaabshay
MUQDISHU AL PORT. (albayrak) haddana la filaayo maamlamaha soo socdo xafladii xil
wareejinta.

Mudane Guddoomiye naga guddoon salaanta islaamka ACWW.

Magacda saxiixayaasha Xildhibaanada Mooshinkan.

1. Jowahir Ahmed C/Mi 
2. A. Sh. Ismail 
3. Maxamed Cabdi Yusuf 
4. Ahmed Kosaar 
5. Hassan MO'ali Hussein 
6. ~~Ahmed Xaaji Maxamed~~ 
8. Faisal Umar Guled 
9. Sainab Caamir 
10. Amin Omar Jaamac 
11. Mohamed Hussein Ruv 
12. Maxamed Ibrahim Xaabsade 
13. Bashir Adow Masood 
14. Osman Hazi Ali 
15. Abolucadir M. Aden 
16. OMAR Mohamed Mohamed 

Tix: GSH/07/14
Kalfadhiga: 4aad
Kulankiisa 5aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

20th Abriil 2014



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR BARLAMANI AH

(RESOLUTION)

GO'AAN GOLAHA SHACABKA OO LA XIRIIRA HESHIIS AY XUKUUMADU
LA GASHAY SHIRKAD TURKI AH OO KU SAABSAN MAAMULKA
DEKEDDA CAALAMIGA AH EE MUQDISHO 24kii OKTOOBAR 2013

[Handwritten signature]

Muqdisho, 2^{da} Abriil 2014

GOLAHA SHACABKA

Markuu arkay mas'uuliyadda ka saarran metelaada danaha guud ee shacabka iyo ilaalinta xuquuqda qofka;

Markuu arkay Qodobka 69 ee Dastuurka JFS oo qeexaya Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah;

Markuu arkay Qodobka 2aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka faqradiisa (p) ee ku waajib yeeleysa Golaha Shacabka ansixinta heshiisyada Caalamiga ah iyo heshiisyada ay Xukuumaddu la gasho Dowlado ama dhinacyo kale;

Markuu arkay Qodobka 99 (a, b, c, e) ee Dastuurka JFS oo qeexaya Xilka Golaha Wasiiradda;

Markuu arkay Qodobka 116 ee Dastuurka oo qeexaya ilaalinta xuquuqda Shaqaalaha Rayidka ah;

Markuu arkay Sharci Lambar 7 ee Jannayo 1977 qeexayana Sharciga Maalgashiga Shisheeye ;

Markuu arkay Sharci lambar 19 ee Maarso 1987 oo qeexaya Sharciga Maalgashiga Shisheeye;

Markuu Kabaaraandegay: Cabashada Shaqaalaha Danyarta ah ee ka hawlgala Dekedda Caalamiga ee Muqdishu;

Markuu Tixgeliyay Daruufaha dhaqaale ee dalka ka jirta;

Wuxuu: Kalfadhiga 4aad kulankiisa 05 ee taariikhdu 02/04/2014 uu guddoonsaday qaraarkan:

Qodobka 1aad

In xukuumadda Federaalka Soomaaliya ku wareejin karin Dekedda Caalamiga ee Muqdisho Shirkad inta Golaha Shacabku ka xaqiijinayo waafaqsanaanta heshiiskan faritaanada sharciga maalgashiga shisheeye ee kor ku xusan iyo habraacyada heshiis-gelidda gaar ahaan sharci lambar 7 iyo 19 ee xeerinta maalgashiga shisheeye; Xeerka Maamulka Maaliyadda iyo Xisaabaadka Sharci lambar 1 ee

29kii Disember 1962 (Qodobada 32(a), 33(1) iyo wax ka bedelkiisii 27kii December 1971; sidoo kale Sharci lambar 2 ee 29 Disembar 1962 iyo wax ka bedelkii 27 Disember 1971 ee hubinta sharciyadda heshiisyada xukuumadu gasho; Sharci No. 1, Qodobka 33(1) habraaca diiwaangelinta heshiisyada; sharci No. 2 Qodobkiisa 52aad ee tilmaamaya noocyada qandaraasyada, qodobka 53aad ee tilmaamaya habraaca bixinta qandaraasyada, Qodobka, Qodobka 57 (3) Bixinta Qandaraasyadda Debadda, Qodobka 56 ee tilmaamaya Qaabdhismeedka Guddiga Qandaraasyadda oo ah Guddiga kaliya ee leh awood qandaraas bixin, Qodobka 58aad ee tilmaamaya Habraaca qandaraas bixinta.

Qodobka 2aad

In shaqaalaha danyarta ah ee ka hawlgala dekedda laga fariisin karin shaqadooda si sharcidarro ah iyada oo la xurmeynayo qodobka 116aad ee dastuurka;

Qodobka 3aad

In ay xukuumadu horkeento Golaha Shacabka heshiiska ay la gashay shirkadda Turkiga muddo bil (30 maalmood) gudaheed ah;

Qodobka 4aad

In xukuumadu fiiri u yeelato jiritaanka xeerarkii dalku lahaa, ayna ilaalintoodu tahay waajib dastuuri ah sida uu na farayo qodobka 139aad ee dastuurka iyada oo Golaha Shacabku yahay hay'adda kaliya ee awood sharci u leh inay buriso, wax ka bedesho ama wax ku kordhiso shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.